Macluumaadka hadda jira ee ku saabsan SocialCard ee Hamburg – macluumaad loogu talagalay dadka qaata gunnooyinka sida uu qabo Xeerka Gunnooyinka Magangalyo-doonka (AsylbLG)

Waa maxay SocialCard?

SocialCard waa **kaarka kiridhitka Visa** wuxuuna shaqeeyaa debaaji la'aan. Waxay awood kuu siinaysaa inaad si degdeg ah oo aan dhib lahayn u isticmaasho gunnooyinkaaga kaashka ah si waafaqsan Xeerka Gunnooyinka Magangalyo-doonka. Waxaad isticmaali kartaa lacagta isla marka kaadhka lagu soo shubo.

SocialCard ma laha wax xaddidaad kiridhit ah. Wax lacag wareejin ah kuma samayn kartid SocialCard adigoo ku wareejinaya akoon mana samayn kartid SEPA lacag wareejin toos ah.

Waxaad SocialCard u isticmaali kartaa sidii **kaar ahaan** ama waxaad ku isticmaali kartaa **taleefankaaga casriga ah**. Si aad SocialCard ugu isticmaasho taleefankaaga casriga ah, waa inaad Xafiiska Socdaalka hore u siisay lambarkaaga mobilka gacanta.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan SocialCard guud ahaan iyo ku isticmaalkiisa taleefanka casriga ah waxaa laga heli karaa halkan (websaydka bixiyaha Publk GmbH).

Yaa helaya SocialCard?

Waxaad heli doontaa SocialCard haddii aad markii ugu horeysay lacag ka heshay Xeerka Gunnooyinka Magangalyo-doonka **tan iyo** Febraayo 15, 2024 oo aad ku nooshahay **xarunta soo dhawaynta koowaad ee Hamburg**.

Haddii aad qaadatay SocialCard oo aadna ka guurtay xaruntii hore ee soo dhawaynta, waxa aad haysan kartaa SocialCard oo waxaad lacagta u heli kartaa si waafaqsan Xeerka Gunnooyinka Magangalyo-doonka.

Haddii aad hore lacag uga heshay Xeerka Dheefaha Magangelyo-doonka **kahor** Febraayo 15, 2024, ma heli doontid SocialCard, xitaa haddii aad ku nooshahay xarunta soo dhawaynta ee koowaad.

Sidee baa SocialCard lacag loogu shubaa?

Haddii aad qaadatay SocialCard, Xafiiska Socdaalka ayaa si otomaatig ah oo dhijitaal ah lacagta ugu shubi doona SocialCard.

Uma baahnid inaad u tagto hay'ad ama diiwaanka lacagta caddaanka ah si lacag loogu shubo SocialCard bil kasta – uma baahnid inaad aado Xafiiska Socdaalka ama xafiiska degmada midna. Lacag caddaan ah lama bixin doono, xitaa haddii aad tagto xafiiska kaashka ee maamulka degmada Wandsbek.

Marka loo eego Sharciga Gunnooyinka Magangalya-doonka, lacagta ma ku heli karaa akoon ama kaash ahaan bedelkii aan ka heli lahaa SocialCard?

Maya. Lacagta hoos timaada Xeerka Gunnooyinka Magangalyo-doonka waxa **kaliya** oo lagu shubi doonaa SocialCard haddii aad lacag ku heshay Xeerka Gunnooyinka Magangalyo-doonka markii ugu horaysay ee Hamburg tan iyo Febraayo 15, 2024 oo aadna ku noolayd xarun soo dhawayneed oo bilaw ah wakhtigaas. Hay'addu markaas lacagta kuma wareejinayso akoon ama kuma bixinayso kaash ahaan.

Waxaad akoonkaaga ka furan kartaa bangi si ka madax bannaan SocialCard, tusaale ahaan haddii aad shaqeyso oo aad qaadato gunnooyin dheeraad ah sida uu dhigayo Xeerka Gunnooyinka Magangalya-doonka. Si kastaba ha ahaatee, waxa kaliya oo aad lacagga ku heli doontaa SocialCard sida uu dhigayo Xeerka Gunnooyinka Magangalya-doonka.

Immisa SocialCard ayay helayaan qoyska?

Qof kasta oo ka weyn 18 sano wuxuu helayaa SocialCard u gaar ah - oo ay ku jiraan carruurta qoyska ee **ka weyn** 18.

Lacagta loogu talagalay carruurta **ka yar** 18 sano waxaa lagu shubaa SocialCard ee hooyada ama aabbaha. Idinka ayaa go'aaminaya midaas.

Halkee baan ku bixin karaa SocialCard?

Waxaad SocialCard ee Hamburg ku bixin kartaa dukaamada Jarmalka (tusaale ahaan dukaamada waaweyn iyo dukaamada kale ama adeeg-bixiyayaasha sida timo jaraha, Deutsche Bahn, iwm.).

SocialCard kuma isticmaali kartid dibadda ama internetka. Sidoo kale uma shaqeeyo xawaaladaha iyo adeegyada lacagta caddaanka ah, boonooyinka iibsiga ama khamaarka.

Waxaad SocialCard wax kaga iibsan kartaa meel kasta oo kaararka VISA laga aqbalo. Astaanta VISA ka raadi dukaanka ama weydii!

Lacag caddaan ah ma kala soo bixi karaa SocialCard?

Qof kasta oo weyn (*da*'diisu tahay 18 ama ka weyn) wuxuu kala bixi karaa €50 oo kaash ah bishiiba.

€10 dheeraad ah bishiiba ayay kala bixi karaan ilmo kasta (*ilaa* 18 jir ah).

Kaashka waxaa lagala bixi karaa ATM-yada bangiga (iyadoo la iska qaadayo khidmad) iyo dukaamada (si bilaash ah). Lacag kala bixitaanada ATM-yada waxaa ku kacaysa €2 **halkii** kala bixitaanba. Waxaad halkan ka ogaan kartaa meesha aad kaash kala bixi karto weliba si bilaash ah. Si aad u samayso lacag la bixid dukaanka dhexdiisa ah, waxa aad u baahantahay in aad iibsato alaabo qiimaheedu yahay ugu yaraan €5-10.

Haddii aad ka guurto xarunta koowaad ee soo dhawaynta (oo aad u guurto hoy ku xiga ama, si gaar ah, laguugu oggolaado inaad si gaar ah meel u degto), ma jirto xad lacageed ilaa iyo inta kiridhitkaaga aan la isticmaalin.

Kharashyo noocee ah ayaan geli karaa markaan isticmaalayo SocialCard?

Bixiyaha kaadhka waxa laga yaabaa inuu galo kharashyada soo socda:

Haddii aad kala baxdo lacag kaash ah:

- Si bilaash adigoo wax ka iibsanaya dukaanka. Lacagta ugu yar ee isticmaalkan waa €5-10. Waxaad ogaan kartaa dukaamada aad kala bixi karto lacag kaash ah halkan.
- € 2.00 **halkii** lacag la bixid oo laga sameeyo ATM-ka.

Haddii aad lacag ku bixiso dukaanka:

- Bilaash ah **ilaa** 20 lacag bixino bishiiba.
- € 0.08 **halkii** lacag-bixin ah **laga soo bilaabo** lacag bixinta 21aad bishiiba.

Xaaladaha gaarka ah, kharashyo sareeyo ayaa laga yaabaa in lagu dabaqo:

- dalabaadka lacag bixinta ee lagu muransan yahay: € 20.00 (eeg halkan ee heshiiska isticmaalaha bogga 3 ee hoos yimaada "la macaamilka dalaabaadyada lacag-bixinta ee aan la fulin ama si khaldan loo fuliyey").
- Dib u soo celinta khidmada ee la diiday: € 25.00.

Halkeen ka ogaan karaa inta lacag ah ee aan wali ku haysto kaadhka (haraaga)?

Waxaad eegi kartaa haraaga lacagtaada wakhti kasta adigoo isticmaalaya ablikeeshinka Secupay (xog dheeraad ah oo ku saabsan arrintaas ka ogow halkan) ama waxaad ka ogaan kartaa khadka ; tixraac Macluumaadka loogu talagalay isticmaalayaasha SocialCard.

Maxaa ku dhacaya SocialCard haddii aanan helaynin gunnooyinka AsylbLG?

Haddii aadan wax lacag ah ka helayn Xeerka Gunnooyinka Magangalya-doonka, weli waad sii haysan kartaa kaarka. Lacag kale laguma soo shubi doono kaadhka.

Fadlan u isticmaal haraagaaga sida ugu dhakhsaha badan! Haddii kale, khidmado gaaraya € 1.50 bishiiba ayaa laga yaabaa in lagu dabaqo kaarka.

Uma baahnid inaad soo celiso SocialCard; Adiga ayaa ku tuuri kara qashinka.

Tusaale ahaan, lacag kuma heli doontid kaarka sida uu dhigayo Xeerka Gunnooyinka Magangalyo-doonka haddii aad aqoonsiga magangalyada ka heshay nidaamka magangalyada, aad shaqaysato lacag kugu filan ama aad hesho gunnada muwaadinka ee Jobcenter.

Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa websaydka bixiyaha kaadhka (Publk GmbH) iyo shuruucda isticmaalka SocialCard. ***Fadlan ogow, si kastaba ha ahaatee, in xayiraadaha kor ku xusan ay khuseeyaan Hamburg (laguma isticmaali karo internetka ah ama dibadda; xaddidaadda caddadka kaashka ee lala baxayo).***